# Khataraha Amaanka 17

1. Natiijooyinka xaalada qoyska/xarunta ee guriga/xarunta aanu joogin ruux wayn oo qabta masuuliyada waalidnimo/daryeelka ilmaha iyo masuuliyadaha xaqiijinaya amaanka ilmaha.
2. Xaalada qoyska/xarunta waxaa weeye in qorshaha nolosha/daryeelka ilmaha ay saamayn daran ku yeelan karto caafimaadka jidhka ilmaha.
3. Daryeelayaasha samaynaya (u dhaqmaya) wax dagaal ama khatar leh iyo habdhaqan saamayn kara amaanka ilmaha.
4. Waxaa jirta dhacdooyin tacadiga guriga dhaxdiisa ah oo saameeyay amaanka ilmaha. Hadii "Haa" ay tahay, buuxi su'aasha soo socota:
    a. Dhib wadayaasha tacadiga guriga dhaxdiisu waxay keeneen khatar waxyeelo ama waxay khatar waxyeelo u gaysteen ruuxa wayn ee dhibanaha/daryeelaha ilmaha ah.
    b. Dhib wadaha tacadiga guriga dhaxdiisu waxa uu waxyeelo daran ama khatar ku noqon karaa ilmaha.
    c. Heerka tacadiga iyo/ama khatarta ruuxa wayn ee dhibaha ah ama ilmaha ayaa u korodhay si wayn oo waxyeelo ayaa ka iman karta.
    d. Waxaa jira muujino kale oo kordhinaya khatarta dhib wadayaasha tacadiga guriga dhaxdiisa sida khatar khaarajin nafta ah ama isku day, balwado ama ku hanjabaad hub.
5. Daryeelayaashu ma doonayaan ama awoodaan inay xakameeyaan habdhaqankoda iyo habdhaqanka saamayn kara amaanka ilmaha.
6. Daryeelayaashu waxay u arkaa ilmaha si xun.
7. Daryeelayaashu ma yeelan karaa ama isticmaali karaan khayraadka daruuriga u ah in lagu buuxiyo baahiyaha aas aasiga ah ee ilmaha oo khatar dhakhso ah ku leh oo waxyeelo daran ilmaha.
8. Aragtida, dareenka iyo habdhaqanka daryeelaha waxaa weeye mid khatar gelin karta waxyeelo daran ilmaha ama looga baqo inay in si xun ula dhaqan ilmaha yimaado ama loogu baahdo in ilmaha cid kale lagu wareejiyo.
9. Daryeelayaasha doonayay inay waxyeelo daran ilmaha gaadhsiiyaan.
10. Daryeelayaasha aan lahayn aqoonta, xirfadaha ama rabitaanka waalidnimo ee daruuriga u ah xaqiijinta amaanka ilmaha.
11. Daryeelayaasha diida waxka qabadka DCYF, diida helitaanka ilmaha ama marka ay jiraan waxyaabo daryeeluhu uu ka cararayo.
12. Daryeelayaasha aanu buuxin, buuxin karin ama aan doonaynin inay buuxiyaan baahiyaha jidh, dareen, caafimaad ama habdhaqan ee ilmaha.
13. Daryeelayaasha ma awoodaan ama diyaar uma aha inay sharaxaan dhaawacyada ama si xun ula dhaqanka ilmaha ama waxay ku sheegeen ma waafaqsanada xogta la hayo.
14. Ilmuhu waxa uu qabaa dhawaac jidh oo daran ama xaalad jidh oo daran oo keeni kara khatarta nafta ah.
15. Ilmaha ayaa muujiyay astaamo dareen oo daran ama xako habdhaqan oo liita oo keeni kara habdhaqan burbuin nafta ah ama keeni kara jawaab celin khatar ah oo daryeelayaasha ah.
16. Ilmaha ayaa ka baqanaya xaalada guriga/xarunta ama dadka guriga/xarunta jooga.
17. Tacadi galmo oo ilmaha ayaa laga shakiyay, dhacday ama raad ayaa jira sheegaya inuu dhici karo.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

DCYF CWP_0016 A SM (07-2019) Somali

# Shuruudaha Qorshaha Amaanka

Si loo eego hadii khatar amaan ay jirto, **dhamaan shanta** shuruudood ee soo scoda waa in la buuxiyaa:

- Raad daran oo ilmaha ah.
- Marka ama dhici kara mustaqbalka dhaw.
- Ilmo nugul marka loo eego khatarta amaanka.
- Xakamaha Ka Baxay: Ma jirto masuuliyad waalid/daryeele ama ruux wayn oo guriga jooga oo kahortagi kara khatarta.
- Habdhaqano, xaalado, imw., gaar ah, la arko oo si cad loo fahmi karo.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

DCYF CWP_0016 B SM (07-2019) Somali